JIRROOYINKA CARRUURTA IYO DAAWEYNTOODA

Tilmaanbixinnada caafimaadka iyo nololwanaagga dadka dalka u soo guuray

Funded by
Asylum, Migration and Integration Fund, AMIF, of the European Union

MARJAT
Maahanmuuttajien kotoutumisen edistäminen terveyden ja hyvinvoinnin keinoin

TURKU AMK
TURKU UNIVERSITY OF APPLIED SCIENCES

TURKU

Sateenkaari Koto

Cudurka caloosha (cudurka hunqaacada)

- Cudurada caloosha waxaa sababa fayrus ama sumowga cuntada
- Cudurka caloosha ee uu fayruska sababo waxaa si fudud loogu kala qaadaa taabashada sidaas darteed waxaa aad muhiim u ah dhaqista gacmaha.
- Calaamadaha cudurku waa calool canuun, hunqaaco iyo calool jilicsan.
- Calool xanuunka waxaa qeyb ka noqon kara madax xanuun iyo xumad.
- Carruurta inta badan guriga ayaa lagu xannaneyn karaa: ku dadaal in **cunuggu uu wax badan cabo**, si uusan u qallalin.
    - cunugga jirran waxaa la siin karaa cabitaanka uu jecelyahay
    - farimashiyaha waxaa lagu iibiyaa cabitaanka shubanka

Dhatarka aad:

- haddii hunqaacda ama shubanku ay socdaan wax ka badan saddex maalmood
- haddii hunqaacada ama shubanku ay maanta oo dhan socdaan
- haddii uu cunuggu ka yaryahay sannad barkiis
- haddii uusan cunuggu waxba cabeyn
- haddii uu cunuggu daalan yahay ama uu tabaryar yahay

Goormee xannaano-maalmeedka lagu celinayaa?

Marka ay calaamadaha cudurku dhamaadaan caafimaadka guud ee cunuguna uu u saamaxo.

Gooryaan dirxiyeed

- Gooryaan dirxiyeedku waa dirxi yar (1-2 sentimitir) oo cad, kaas oo ku nool mindhicirka qofka.
- Qaadista cudurkan waa mid ku badan carruurta ku jirta da'da xannaano-maalmeedka iyo dugsiga. Gooryaan dirxiyeedyadu ma ahan calaamad muujineysa daryeel ama nadaafad xumada cunugga.
- Waxaa laga qaadaa liqista ugxaanta dirxiga ama waxaa laga qaadi karaa tusaale ahaan taabashada gacmaha, alaabta carruurtu ku ciyaarto, dharka ama dharka sariirta.
- Calaamadaha lagu garto waa cuncun daloolka dabad ah, gooryaan dirxiyeedyada oo lagu arko dabada afkeeda iyo saxarada.
- Waxaa la helaa daawo afka laga qaado oo si is-

kaa ah la isaga daweeyo gooryaan dirxiyeedka (tusaale Pyrvin iyo Vermox). Inta badan qoyska isku wakhti ayaa laga daaweeyaa si dadka aan calaamadaha lagu arag looga daaweeyo. Daaweynta waxaa sidoo kale lagu daraa dhaqitaanka dharka hoos laga xirto iyo kan sariirta iyo musqusha oo lagu sameeyo nadaafad todobaadle ah. Ugxaanta waxaa sidoo kale lagu dili karaa Saunada ama hawada qabow.
- Qaadista gooryaan dirxiyeedka waa in lagu wargeliyaa xannaano-maalmeedka si loo daweeyo xanuunkan safmarka ah ee laga yaabo in uu socda.

Goormee xannaano-maalmeedka lagu celinayaa?
Marka daaweynta la billaabo

Injirta madaxa

- Injirta madaxa gashaahi waa xasharaad yar oo aan baalal laheyn islamarkaasna aragga gudbisa, qiyaastiina dherer-keedu waa 2-3 sentimitir.
- Xannaano-maalmeedyada iyo dugsiga waxaa lagu arkaa safmar yar oo injirta madaxa gasha ah.
- Injirta madaxu waxey isaga gudubtaa madaxyda tusaale ahaan marka ay carruurtu ciyaarayaan. Injirta maduxu ma duusho mana booddo. Waxaa sidoo kale lagu kala qaadi karaa dharka sariirta, shanlooyinka timaha ama madax-gashiyada.
- Injirtu waxey sababi kartaa cuncun. Meelaha ay qaniinto waa ay casaan karaan. Markasta ma lahan wax calaamado ah. injirta maduxu cuduro ma faafiso.
- Daryeelka injirta madaxa waa in la billaabaa islamarka timaha lagu arko.
- Daryeelka ugu wanaagsan waa ku shanleynta shanlaha injirta ee ay ilkihiisu aad isugu dhow yihiin. Timaha waa laga shaqeynayaa, daawada lagu daweynayo ayaa lagu fidinayaa waxaana shanleynta laga soo billaabayaa timaha salkooda iyadoo qeybqeyb loo shanleynayo. Shanleynta waxaa loo sameeyaa maalin dhaaf muddo labo todobaad ah.
- Injirta madaxa waxaa lagu saaraa shaambada injirta iyo milanka.
- Qaadista injirta waa in lagu wargeliyaa xannaano-maalmeedka ama dugsiga.
- Uma baahna cunuggu in uu ka maqnaado xannaano-maalmeedka, marka daryeelka la billaabo.
- La xiriir rugta caafimaadka, haddii is-daryeelis la sa-

meeyay, laakiin aysan waxba kaa caawin.

Goormee xannaano-maalmeedka lagu celinayaa?
Marka daryeelista la joojiyo.

Caabuqa isha

- Calaamaduhu waa indhaha oo cassaada, xanfaf iyo fiish ka yimaada.
- Calaamdahan waxey ku bogsoon karaan 3-5 maalmood gudohood
- Durayga marka uu qofku hayo ayaa indhaha lagu arki karaa casaan iyo biyo
- Waxaa lagu kala qaadaa taabashada. Cunuggu wuxuu marmarayaa indhihiisa kaddibna wuxuu taabanaa alabaata lagu ciyaaro iyo alaabaha kale, kuwaas oo ay dadka kalana ka sii qaadayaan.
- Is-daryeelista: Nadiifinta iyo biyaraacinta indhaha. Nadaafadda gacmaha oo wanaagsan.
-

Dhakhtarka aad:

- Haddii ay indhuhu aad u fiishayaan islamarkaasna lur badan yihiin.
- Haddii loo baahdo dhakhtarka ayaa qoraya goojo antibiyootig ah.
- Dhakhtarka waa in la aadaa haddii uu xanuun ka jiro agagaarka isha iyo haddii awoodda aragu ay wiiqanto, ishu aysan iftiinka u adkeysan karin ama ay sii deyso dhacaan dhalaalaya. Agagaarka ishu haddii uu bararana waa in dhakhtarka la aadaa.
- Xannaano-maalmeedka waxaa la aadi karaa marka ay ishu bogsooto.

Cudurka Molluskum

- Cudurka Molluskum waa nabaro jirka ku yaal oo uu fayrus sababo.
- Waxaa lagu kala qaadaa jirka oo istaabta. Waxaa uu ku badan yahay carruurta ku jirta da'da ciyaarta iyo dugsiga, dadka waaweynna wuxuu ku yahay dhif.
- Honqoradu waxey inta badan qaataan bilo, mararka qaar 1-2 sano, iyagoo aan wax haaro ah ka tiginna waa baaba'aan. Molluskumyadu waa ay soo laaban karaan.
- Honqoradu sida caadiga ah waa badan yihiin. Waxey ku badan yihiin soonaha jirka ee khafiifka ah, sida meesha xusulku ka laabmo, cajirada iyo meelaha jilbku ka laabmo
- Caabuqa iyo cuncunku waa calaamadaha bogsooshada.

Dhkhtarka aad:
Cudurka Molluskum dartiis looma baahna in dhakhtar loo tago. Kalkaalisada caafimaadka ayaa

la tusi karaa haddii aan la hubin waxa ay nabaradu yihiin.

Goormee xannaano-maalmeedka lagu celinayaa:
Cunuggu wuxuu sidiisi caadiga aheyd u wadan karaa xanaano-maalmeedka ama dugsiga.

Dab-dhul

- Dab-dhulku waa caabuq ay bakteeriyo sababto oo jirka ku dhaca, kaas oo si fudud loo kala qaado. Carruurtu marka ay ciyaarayaan ayeey isku qabadsiiyaan.
- Dab-dhulku wuxuu ka soo baxaa jirka oo dhan, laakiin wuxuu ku badan yahay waji-ga iyo agagaarka afka iyo weliba meelaha tintu ka bil-laabato iyo gacmaha.
- Dab-dhullada yaryar waxaa ku filan in lagu daweeyo meelaha ay ku yaalaan boomaato antibiyootig ah oo saabuun inta lagu dhaqo kaddib maalinti labo jeer la mariyo muddo todobaad ah.
- Halista isqabadsiinta waxaa lagu yareeyaa nafaafad wanaagsan oo ay ku jiraan ku dhaqista saabuunta, istic-maalka daawada jeermiska ee gacmaha.

Dhakhtarka aad:
Dhakhtarka waa in la aadaa haddii uu 1-3 maalmood gu-dahood dab-dhulku uu ku fido soone ka ballaaran lix sentimitir oo labajibbaaran. Marka laga reebo boomaatada antibiyootiga ah waxaa lagu daaweeyaa kuuro antibiyootig ah oo afka laga qaado, taas oo socota 7-10 maalmood..

Goormee xannaano-maalmeedka lagu celinayaa:
Carruurta yaryar ma aadi karaan xannaano-maalmeedka kahor inta aysan nabaradu qallalin qol-faha oo dhanna aysan soo fuqin.

Ilaha macmuulaadka:
- www.thl.fi/fi/web/lastenneuvolakasikirja/ohjeet-ja-tukimateriaali/terveysneuvonta/infektiot
- www.terveyskirjasto.fi/terveyskirjasto/tk.koti